



OGOW XUQUUQAHAAGA

Daryeelka Ilaalinta Jinsiga

Daryeelka Ilaalinta Jinsigu waa Sharci waana mid la Ilaaliyo marka la joogo gudaha Goboka Washington

Washington waxay ilaalinaysaa Helitaanka Daryeelka Ilaalinta Jinsiga:¹

- Caymisyada iyo qorsheyaasha caafimaadku waa inaysan samaynin wax takoor ah nooc walba oo uu yahay kaasoo ku salaysan rabitaanka nooca galmada ee qofka ama nooca jinsiga uu yahay.
- Washington waxay ka mamnuucaysaa caymisyada caafimaadka iyo qorsheyaasha caafimaadka ee caymiska buuxa haysta inay diidaan ama ay xadidaan caymiska daryeelka ilaalinta jinsiga ee dadka da' walba oo ay yihiin marka loogu qoro inuu caafimaad ahaan lagama maarmaan u yahay, waafaqsan yahay nooca ama aqoonsiga jinsiga qofka, iyo si waafaqsan daryeelka jinsiga ee la ogolyahay.²
- Diidmada ama xadidaada noocaas ah waa mid mamnuuc ah haddii uusan bixiyaha daryeelka caafimaadka ee khibrada u leh ee qoraya ama bixinaya daryeelka ilaalinta jinsigu uusan dib u eegis ku samayn uusana xaqiijin in diidmada ama xadidaadu ay ku salaysan tahay sabab caafimaad oo sax ah.
- Da'da ayaa kamid noqon karta dhowrka qodob ee la xeerinayo marka la go'aaminayo in howshu caafimaad ahaan muhiim tahay iyo in kale loona qoray si waafaqsan xeerarka daryeelka ee la isla ogolyahay.³
- Caymisyada caafimaadka iyo qorsheyaasha caafimaadku waa inaysan isticmaalin ka reebista noocyo kamid ah waxyaabaha la isku qurxiyo ama la marsado si ay u diidaan daryeelka ilaalinta jinsiga marka loo qoro inay caafimaad ahaan muhiim yihiin.
- Washington Health Care Authority (HCA, Wakaaladda Daryeelka Caafimaadka ee Washington), qorsheyaasha daryeelka ay Medicaid maamusho, iyo daryeel bixiyaasha daryeelka caafimaadka ee bixinaya ama qoraya adeega ay bixiso HCA waa inaysan takoor samayn marka ay qorayaan ama bixinayaan adeegyada daryeelka ilaalinta jinsiga ayaga oo ku salaynaya nooca ama aqoonsiga jinsiga qofka caymiska kujira.⁴

- Barnaamijka Medicaid ee Washington, Apple Health, wuxuu daboolayaa daryeelka ilaalinta jinsiga marka uu caafimaad ahaan muhiim yahay, ammaan yahay, waxtarna leeyahay, lana tijaabiyay.⁵
- Qorsheyaasha caafimaadka shaqaalaha gobolka waxaa si gaar ah ugu jira caymiska daryeelka ilaalinta jinsiga.⁶
- Gudaha Washington, waa habdhaqan xirfad xumo ah in bixiyuhu ku sameeyo baxnanaada badelaada bukaanada da'doodu ka yartahay 18 sanno.⁷
- Daryeel Bixiyaasha Caafimaadka, caymisyada, iyo xarumaha waxaa looga baahanyahay inaysan bixin ama aysan mamalgalin daryeelka ilaalinta jinsiga ee khuseeya iska-dhaadhicinta ama sababaha diinta; hase yeeshee, caymisyada caafimaadku waa inay cadeeyaan adeegyada aan caymiska kujirin iyo sida qofku si dhakhso ah ugu heli karo daryeelka.⁸

Washington waxay Shakhsiyadka Washington ku sugan ka Ilaalinaysaa Ficalada Fal-danbiyeedka iyo Madaniga ah ee kajira Gobolada Kale kuwaas oo Xanibaaya ama Danbiga ka dhigaya Daryeelka Ilaalinta Jinsiga:

- Shield Law (Sharciga Gaashaanka) ee Washington wuxuu si ballaaran uga difaacayaa dadka ku sugan Washington baaritaanada iyo dacwadaha maxkamadaha ee gobolada kale kuwaas oo khuseeya daryeelka ilaalinta jinsiga ee sharciga ah ee lagu bixiyo Washington.⁹
- Guud ahaan, Shield Law wuxuu ka mamnuucayaa maxkamadaha Washington, wakaaladaha gobolka iyo kuwa deegaanka iyo hay'adaha sharciga, iyo shirkadaha Washington ka dhisan ama dhinacyada gaarka loo leeyahay inay cid u xiraan, bixinta macluumaadka ama haddii kale ka qaybqaadashada ama u hogaansamidda hanaanada kale ee sharciga gobolka ee la xiriira daryeelka ilaalinta jinsiga ee sida sharciga ah looga bixiyo Washington.

1 Eeg, tusaale ahaan, Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Dib loo eegay ee Washington 48.43.0128; Washington Administrative Code (WAC, Xeerka Maamulka Washington 284-43-5151); RCW 49.60.030(e); RCW 49.60.040(27); RCW 49.60.178(1); RCW 48.30.300(1), (2).

2 Qorsheyaasha caafimaadka ee qofku iska bixinayo ee uu sida tooska ah usoo saarayo loo shaqeeyuhu badalkii caymiska caafimaadku, waxaa lagu maamulaa Employee Retirement Income Security Act (ERISA, Xeerka Sugnaanta Dakhliga Howlgabka ee Shaqaalaha) waxaana qabanaya shuruudka kahortagga takoorka ee Affordable Care Act (Xeerka Daryeelka Qiimaha Jaban) (Farqada 1557). Haddii aadan hubin in qorshahaagu caymis buuxa haysto ama aad adigu kharashka iska bixinayo, waxaad la xiriiri kartaa Guddoomiyaha Caymiska Gobolka Washington (la xiriir macluumaadka hoose), waa uuna ku caawin karaa.

3 Marka la eegayo in howsha daryeelka ilaalinta jinsiga loo maray si waafaqsan xeerarka daryeelka ee la isla ogolyahay iyo in kale, bixiyaha caymiska caafimaadka ama qorshaha caafimaadka ayaa ka tashan kara, tusaale ahaan, xeerarkaas daryeelka ee ku qoran World Professional Association for Transgender Health (WPATH). RCW 74.09.675(1).

4 WAC 182-531-1675(1).

5 Eeg Transgender Legal Defense & Education Fund, Qorsheyaasha Caafimaadka Shaqaalaha Gobolka – Washington, <https://transhealthproject.org/resources/state-employee-health-plans/washington-state-employee-health-plans/>

6 RCW 18.130.180(26); Tingley v. Ferguson, 47 F.4th 1055, 1063-64 (9th Cir. 2022), cert. denied, 144 S. Ct. 33, 217 L. Ed. 2d 251 (2023).

7 RCW 18.130.160.

8 RCW 7.115.020.



OGOW XUQUUQAHAAGA

Daryeelka Ilaalinta Jinsiga

- Shield Law wuxuu sidoo kale bixiyeyasha daryeelka caafimaadka ee Washington ka ilaalinayaa handadaadaha iyo xadgudubyada asaga oo ayaga iyo xubnaha qoyskoodaba ka dhigaya kuwo u qalma Address Confidentiality Program (Barnaamijka Sirta Ciwaanka ee Washinngton).
- Wuxuu u oggolaanayaa shakhsiyaadku inay maxkamada ka dacweeyaan saraakiisha gobolka ka baxsan sabab la xiriirta inay soo fara-galiyeen adeegyada daryeelka caafimaadka qofka ee la ilaaliyay ee kajira Washington.¹⁰
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Shield Law ee Washington waxaa laga heli karaa: <https://www.atg.wa.gov/reproductive-and-gender-affirming-care-shielding-providers-seekers-and-helpers-out-state-legal>

Washington waxay ilaalinaysaa Helitaanka Macluumaadka Caafimaadka Gaarka ah ee Dhalinyarada:

- Hoy-yada dhalinyarada ee ka sharciyaysan Washington waxaa mamnuuc ka ah inay la xiriiraan waalidiinta ama mas'uuliyiinta dhalinyarada joogta hoy-yada marka dhalinyaradu raadinayso daryeelka ilaalinta jinsiga.
- Taas badalkeeda, hoyga dhalinyarada ee sharciyaysan waa inuu lasoo xiriiraa Department of Children, Youth, and Families, (Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoyska), 72 saacadood gudahood marka dhalinyaradu timaado hoyga.¹¹
- Shaqaalaha dugsiyada dowladda ee Washington waa inaysan la wadaagin macluumaadka waxbarashada ama caafimaadka sirta ah ee ardayga (oo ay kujiraan badalista jinsiga ee ardayga ama xaaladiisa jinsiga ee aan la hubin ama jinsiga loo aqoonsaday markii uu dhashay) cid kale, oo ay kujiraan waalidiinta ardayga, ardayda kale, shaqaalaha dugsiyada, ama dadka aan dugsiyada ka tirsanayn, in uu sharcigu ku khasbayo maahane¹² ama in ardaygu u fasaxo inuu la wadaago maahane.¹³

Ma qabtaa Cabashooyin ama walaacyo ku saabsan xadgudubyada sharciga gobolka?

- Apple Health (Medicaid) iyo dadka ka diiwaangashan Public Employees Benefits Board (PEBB, Guddiga Dheefaha Shaqaalaha Dawlada) iyo School Employees Benefits Board (SEBB, Guddiga Dheefaha Shaqaalaha Dugsiga), kala xiriir Iskuduwaha Americans with Disabilities Act (ADA, Xeerka Naafada Maraykanka) ee Health Care Authority: Oonleenka: <https://support.hca.wa.gov/hcasupport>; Phone: 855-682-0787; Iimaylka: compliance@hca.wa.gov
- Dhammaanba dadka ka diiwaangashan qorsheyaasha kale ee dadryeelka caafimaadku, hala xiriiraan:
 - Office of the Insurance Commissioner (Xaafiiska Guddoomiyaha Caymiska): Taleefanka: 800-562-6900; Teleefoonka TDD: 360-586-0241; Oonleenka: <https://www.insurance.wa.gov/complaints-appeals-fraud/complaints>
 - Washington State Human Right Commission (Guddiga Xaquuqul Insaanka ee Gobolka Washington): Taleefanka: 800-233-3247; Oonleen: https://wahum.my.site.com/FileaComplaintOnline/s/?language=en_US
 - Attorney General's Office (Xaafiiska Garyaqaanka Guud): Teleefoonka (gudaha WA): 800-551-4636; Teleefoonka (dibadda WA): 206-464-6684; Adeega Relay: 800-833-6388; Oonleenka: <https://www.atg.wa.gov/contactus.aspx>
- Wixii ku saabsan cabashooyinka ama tabashooyinka la xiriira dugsiyada dawlada ee Gobolka Washington, kala xiriir Washington State Office of the Superintendent of Public Instruction's Equity and Civil Rights Office (Xaafiiska Kormeeraha Guud ee Sinaanta Waxbarashada ee Gobolka Washington iyo Xaafiiska Xaquuqaha Bulshada) (360) 725-6162/TTY: (360) 664-3631.

Meesha laga helo Bixiyaasha daryeelka Caafimaadka ee Ilaalinta Jinsiga

- <https://lgbtqhealthcaredirectory.org/>

10 RCW 7.115.040.

11 Eeg RCW 13.32A.082(1)(b), (2)(c)-(d).

12 Tusaale ahaan, Federal Educational Rights and Privacy Act (FERPA, Xeerka Sirta iyo Xaquuqaha Waxbarashada ee Federaalka) ayaa waajibin kara in macluumaadka qaar la gudbiyo. 20 U.S Code (U.S.C., Xeerka Mareykanka) § 1232g; 34 Code of Federal Regulations (C.F.R., Xeerka Sharciyada Federaalka) Qaybta 99.

13 Equity and Civil Rights Office, Washington State Office of the Superintendent of Public Instruction, Ka Mamnuucista Takoorka Dugsiyada Dowladda ee Washington – Hageyaasha dugsiyada degmooyinka si ay u hirgaliyaan Cutubyada 28A.640 iyo 28A.642 RCW iyo Cutubka 392-190 WAC, p. 29 (Febraayo 2012) (https://ospi.k12.wa.us/sites/default/files/2023-08/prohibiting_discrimination_in_washington_public_schools_february2012revisedsep2019disclaimer_1.pdf) (wax ka badalistiis ugu danbaysay 17, 2024); eeg sidoo kale, RCW 28A.642.010; RCW 28A.642.020; RCW 28A.642.080.